



Australian Government

Department of Health

Taageerada murugada iyo dhaawaca ee loogu talagalay kuwa ay saameeyeen COVID-19 ee waaxda daryeelka dadka da'da ah

Dowladda Australiya waxay maalgelinaysaa adeegyada lagu bixinayo murugada, luminta iyo taageerada dhaawacyada waaxda daryeelka dadka da'da ah ee Australiya. Adeegyadan waxaa loo heli karaa deggenyaasha daryeelka dadka da'da ah ee deggan, dadka guryaha ku qaata daryeelka, dadkooda ay jecelyihiin iyo shaqaalaha daryeelka da'da ah. Adiga ayaa u adeegsan kara adeegyadan naftaada, ama u oggolow in kuwa aad jeceshahay iyo bulshooyinka ay ogaadaan.

Waa u bilaash qof walba inuu isticmaalo.

Dhamaan ururadani waa kuwa ixtiraama dhaqanka dadka, diinta, aqoonsiga iyo qaab nololeedka dadka. Haddii adiga ama qof aad jeceshahay u baado afcelin, wac Adeegga Turjubaanka iyo Afcelinta **131 450**. Weydiiso luqaddaada iyo adeegga aad rabtid inaad ku xidhnaato.

Taageero murugo iyo khasaare

La talinta taleefanka:

Xarunta tacaddiga iyo murugada ee Australiya waxay ka caawisaa shaqaalaha daryeelka dadka da'da ah, bixiyeyaasha daryeelka dadka da'da ah, kooxaha diinta iyo kooxaha bulshada inay ka taageeraan bulshadooda murugada iyo qasaaraha ay sababtay COVID-19. Wac **1800 222 200** si aad u heshid talo ku saabsan sida loo caawiyo bulshadaada.

Markaad wacdo, waxaad kala hadli kartaa iyaga wixii ku saabsan waxaad u baahan tahay si aad taageerto adiga ama kuwa aad jeceshahay u heshaan. Tan waxaa ku jiri kara la-talin kooxeed ama kal-fadhi mid-mid ah oo la-talin ah oo lala yeelanayo xirfadle taleefan ahaan (taleefan ama wadahadal fiidiyoow ah), ama qof ahaan.

Xarunta tacaddiga iyo baroorta ee Australiya waxay leedahay shaqaale laba luuqadood ku shaqeeya oo la shaqeeya macaamiisha oo kala ah Carabi, Czech, Farsi, Faransiis, Talyaani, Jabbaan, Maltese, Sinhala, Tamil, Isbaanish iyo Yiddish. Weydiiso luqaddaada markaad wacdo. Luqadaha kale, wac Adeegga Tarjumaadda iyo Af-celinta marka hore **131 450** oo weydii Xarunta Baroorta iyo Tacsida Australiya Xarunta Murugada iyo Baroorta ee Australiya.

Xarunta Baroorta iyo Tacsida Australiya Xarunta Murugada iyo Baroorta ee Australiya waxay kaloo taageertaa adeegsiga Auslan ee loogu talagalay dadka maqalka iyo araga naafada ka ah.

Taageerada waallida:

Taageerada Dementia Australiya waxay bixisaa caawinaad 24-saac ah guud ahaan Australiya, 365 maalmood sanadkii. Waxay siiyaan talooyin iyo ikhtiraayo dadka daryeela qof waallida qaba. Ka wac iyaga **1800 699 799**. Haddii adiga ama qof aad jeceshahay u baahdo afceliye, wac Adeegga Turjumida iyo Afcelinta **131 450** oo weydiiso taageerada Dementia Australiya.

U doodida:

Shabakadda u doodda dadka waayeelka ah waxay u fidisaa adeegyo u doodista daryeelka dadka da'da ah guud ahaan Australiya. Haddii aad dhibaato ku qabtid adeegyada daryeelka dadka da'da ah ee aad heleysid, way ku caawin karaan. Shabakadda u Doodda Dadka Dada ah waxay bixisaa khadma lacag la'aan, qarsoodi ah, u-doodis madax-bannaan, macluumaad iyo waxbarasho ee dadka da'da ah, qoysaskooda iyo wakiilladooda. Ka wac iyaga **1800 700 600**. Haddii adiga ama qof aad jeceshahay u baahdo afceliye, wac Adeegga Turjubaanida iyo Afcelinta **131 450** oo weydiiso Shabakadda U-doodista Dadka Dada ah.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan COVID-19

Waxaa muhiim ah in lala socodsiiyo ilaha rasmiga ah. Booqo health.gov.au ama wac Khadka Caawinta Qaranka ee Coronavirus **1800 020 080**. Adeegyada tarjumaadda iyo afcelinta wac **131 450** oo weydii Khadka Caawinta Qaranka ee Coronavirus.